

Wargeyska Mountain View

Janaayo 13, 2016

Talaado, Janaayo 12-15.....Buuxinta Si Loo Helo Iko Caddeyn, Mountain View
Isniin, Janaayo 18.....Ma Jiro Dugsi, Maalinta Dhallashada Dr. Martin Luther King, Jr.
Arbaco, Janaayo 27.....Shirarka Waalidka/Macalinka, 3:10-7:00 p.m.
Qamiis, Janaayo 28.....Shirarka Waalidka/Macalinka, 12:40-7:00 p.m.
Qamiis, Janaayo 28.....Ka Tagidda Dugsiga 12:40 p.m.
Jimco, Janaayo 29.....Ka Tagidda Dugsiga 12:40 p.m.

Fariinta Agaasimaha

Bishaan waxaan qaban doonaa shirarka waalidka/macalinka si macalimiinta, ardayda, iyo waalidiinta loo siiyo fursad ay ku xussaan koriimada iyo si ay u qabsadaan ujeedooyin laga wada shaqeeyo. Horay ayaad ugu mahadsan tahay in aad caruurtaada ku kaalmeysid in ay yimadaan munaasabadaan. Waa fursad qiimo leh in aan ka wada shaqeyno waxbarashada ugu fiican ee la siiyo caruurtaada.

Waalidiinta iyo Agaasimeyaasha

Agaasimeyaasha waxay jecel yahiin in ay kula kulmaan, kula qeybsadaan waxa ku cusub Mountain View, iyo in ay ka jawaabaan su'aalaha laga yaaho in aad qabtid. Wada hadalkena xiga ee loo qabto Waalidiinta iyo Agaasimeyaasha waxaa lagu qaban doonaa Xarunta Waxbarashada Bulshada (Community Learning Center), maalinta Talaadada, Janaayo 26, marka ay tahay 8:15 a.m. Waxaan rajeyneynaa in aan halkaas kugu aragno.

Buugaagta

Ardayda waxay mas'uul ka yahiin buugaagta laga qaato dugsiga ee loo qaato guriga. Marka ardayda wax yeelaan ama lumiyaan buugaagta ama hantida kale ee taala dugsiga, waalidiinta waxaa laga filaa in ay bixiyaan kharashka si loo baddalo shayga.

Sumadaha Loo Sameeyo Labbiska

Sannad kasta, dugsiga waxaa lagu dhaafaa labbis badan, aan la celin karin, maxaa yeelay laguma soo qorin magaca qofka iska leh. Fadlan badbaadi maalka aad gelisay labbiska caruurtaada adiga oo si cad shay kasta u mariya calaameeyaha labbiska.

Ardayda Laga Qaado Digsiga

Waxaan si adag uga shaqeynaa si ardayda u yimadaan dugsiga waqtiga loogu talagalay maalin kasta. Dugsigena waxaa ka buux arday soo daahda. Marka dugsiga laga maqnaado ilaa muddo, waxay carqalad ku tahay ardayga aan imaanin dugsiga, waxay carqalad ku tahay asxaabta ardayga iyo macalinka. Waxay kaloo dhibaato ku tahay ardayda waqti hore laga qaado dugsiga. Fadlan hubso in aad ardayga horay uga qaadid dugsiga marka aan waxba laga qaban karin. In ardayga laga qaado dugsiga maxaa yeelay waalidka ayaa raba in uu ka hormaro baabuurta ku badan jidadka ma aha sabab la ogolaan karo. Tababarka wuxuu socdaa daqiiqad kasta uu ardayga ku jiro fasalka, ardaydana waxay u baahan yahiin in ay joogaan halkaas in badan ilaa inta suurtoogalka ah. Waad ku mahadsan tahay kaalmada aad ka geysatid xaajadaan.

